

Daawo aadan u baahneyn maku haysataa guriga?

Goobaha Lagu Fogeeyo Daawada



Isticmaalka Haboon • Keydinta Haboon • Fogeeynta Haboon

Waa maxay waxyaabaha aad geyn karto?

Barnaamijka Sanduuqa Fogeeynta Daawada waxa uu dhiiri geliyaa in si amaan ah loo keydiyo ama loogu fogeeyo daawada dhakhtar horey u qoray ama laga soo gato farmashiyaha laakiin aan loo baahneyn. Taas waxaa ka mid ah daawada dadka iyo tan xay-awaanka. Bulshada Degmada Rice waa mid si dhab ah u qaadatay ka hortagga isticmaalka khaldan ee daawada iyo sidii si ku haboon degaanka loogu fogeeyn lahaa daawada aan loo baahneyn.

Maxay Muhim u tahay?

- Isticmaalka khaldan ee daawada dhakhtarku qoro iyo tan laga gato farmashiyaha waa mid khatar ah. In aad si sax u fogeeyso waxa ay ka dhigtaa daawada mid aan la heli karin
- Isticmaalka khaldan ee daawada waxa uu dhibaato u geystaa degaanka. Si haboon oo loo fogeeyo waxa ay badbaadisaa ciidda iyo biyaha.

Goorma ayaa la heli karaa?

Sanduuqa daawada lagu fogeeyo waa mid la heli karo 24ka saac 7da cisho ee todobaadka.

Xagee Sanduuqyadu yaalaan?

Sanduuqa waxaa la dhigay afaafka hore ee:

- Saldhigga Booliska ee Faribault: 25 4th St NW, Faribault, Faribault (Si ku meel gaar ah ayaa loo xiray COVID-19 dartiis)
- Ciidamada Nabadgelyada Northfield: 1615 Riverview Drive, Northfield
- Xafiiska Sheriffka ee Degmada Rice: 118 3rd St NW, Faribault

Liiska farmashiyayaasha degaanka ee aad geyn karto daawada aadan isticmaalin soo booqo ricecountymhc.org/disposal

Maxaan yeelayaa?

- Daawada haka shubin weelkii asalka ahaa ee lagu keenay.
- Ka fuji magacaaga iyo macluumaadka kale ee lagugu aqoosan karo.
- Ku dhaaf magaca/nooca daawada weelka ay ku jirto.
- Ku rid daawada sanduuqa lagu fogeeyo daawada.

Waa lacag
la'aan!

Macluumaad dheeraad ah, la xiriir:
www.ricecountymhc.org/disposal
507-664-3524